



WASAARADA QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA QARANKA

WAXQABADKA WASAARADDA QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA QARANKA (JAN – JULY)

August 2025



info@mopnd.govsomaliland.org



www.mopnd.govsomaliland.org

SHAXDA TUSMADA

1. LIISKA MAGACYADA LASOO GAABIYEEY

2. HORDHAC

3. MAHADNAQ

4. GUNAANADKA MAWAADIICDA

5. WAXQABADKA WASAARADDA QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA QARANKA (JAN – JULY)

1. Tayaynta iyo Kor-u-qaadista Xog-koobidda Qaranka (National Statistics)
 - ✓ Xoojinta Awoodda Istaatistikada Wasaaradda Qorshaynta
 - ✓ Daabacaadaha Tirakoobka iyo Warbixinaha
 - ✓ Tayeynta Xogta iyo Casriyeynta Hababka Istaatistikada
 - ✓ Maareynta, Habeynta, iyo Isku-duwidda Istaatistikada
 - ✓ Kaydinta iyo Faafinta Xogta.
2. Tayeynta Kabcinta Hannaanka Diiwaangelinta Hay'adaha aan Dawliga Ahayn (NGOs)
 - ✓ Fududeynta Diiwaangelinta Hay'adaha aan Dawliga Ahayn (NGOs)
 - ✓ Daraasad ku Saabsan Ururada Maxalliga ah (LNGOs) ee loogu Talo-galay In Loo kala Kala Saaro Darajeeyin ka A, B, C, iyo D
 - ✓ Kaydinta iyo Diiwaangelinta Xogta Hay'adaha aan Dawliga Ahayn
3. Dhammaystirka Habraacyada, Siyaasadaha iyo Xeerarka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka
 - ✓ Dhamaystirka Dib-u-eegista Xeerka Istaatikada
 - ✓ Dhamaystirka Xeerka Qorshaynta Qaranka
 - ✓ Dhamaystirka Siyaasadda Qorshaynta Qaranka
 - ✓ Dejinta Habraaca Siyaasadaha Qaranka
 - ✓ Ururinta iyo Kaydinta Siyaasadaha Qaranka
 - ✓ Dhamaystirka Habraacyada Sanduuqa Horumarinta Qaranka
 - ✓ Xeer-Hoosaadka Xil-Wareejinta Xafiisyada
4. Qiimeynta iyo Dabagalka Mashaariicda Horumarineed ee ka socda Somaliland
 - ✓ Soo-saarka Wareegtada Heer Wasiir ee Dabagalka iyo Qiimaynta
 - ✓ Xogta Qiimaynta iyo Dabagalka Mashaariicaha.
5. Tayeynta Hannaanka Cudduda Shaqaalaha
 - ✓ Dib-u-eegista Waajibaadka iyo Qaab-dhismeedka Waaxaha Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka
6. Isku-dubaridka Hawlaha Qorshaha Horumarinta Qaranka
 - ✓ Qabashada Shir Farsamo ee Dib-u-eegista Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Saddexaad
 - ✓ Diyaarinta Shirweynaha Heerka Sare ee Isku-dubbaridka Horumarka

Liiska soo gaabinta Magacyada

WQHQ	Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta
SQQ	Siyaasadda Qorshaynta Qaranka
HD	Hay'adaha Dawladda
JSL	Jamhuuriyadda Somaliland
SHQ	Sanduuqa Horumarinta Qaranka
GQQ	Guddiga Qorshaynta Qaranka
XQQ	Xeerka Qorshaynta Qaranka
GW	Golaha Wakiilada
QHQ	Qorshaha Horumarinta Qaranka
QM	Qaramada Midoobay
SIHHS	Shirka Iskaashiga Horumarinta Heerka Sare
WMHDH	Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha
HIS	Hannaanka Iskaashiga Somaliland
HiA	Heshiis is-Afgarad
BI	Boqortooyada Ingiriiska
CX	Cilmiga Xogta

Hordhac



Waxaa farxad weyn ii ah inaan soo bandhigo warbixin ku saabsan waxqabadka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka (WQHQ) ee muddada u dhaxaysa January ilaa July 2025. WQHQ waxay si hagar la'aan ah uga shaqeysay dhammeystirka siyaasadaha iyo xeerarka muhiimka ah, oo ay ka mid yihiin dib-u-eegista Xeerka Istaatistikada, Xeerka Qorshaynta Qaranka, Siyaasadda Qorshaynta Qaranka, iyo habraacyada Sanduuqa Horumarinta Qaranka.

Sidoo kale, waxaan fulinay qiimeynno muhiim ah si aan u xoojino fahamka iyo waxtarka mashaariicda horumarineed ee dalka ka socda, iyo kor u qaadidda hannaan isku-duwan oo ku saleysan xog sugan.

Dhinaca kale, waxaan guulo wax ku ool ah ka gaadhay hawlo badan oo muhiim ah sida sahanno tirakoob, diyaarinta shirarka heer qaran iyo heer caalami, casriyeynta nidaamka diiwaangelinta NGOs, iyo kobcinta awoodda shaqaalaha. Waxaan qabanay Shirweynaha Heerka Sare ee Isku-dubaridka Horumarka, waxaana hirgelinay wareegtada Dabagalka iyo Qiimaynta, taas oo ka dhigtay nidaamka Kormeerka iyo Qiimeynta mid nidaamsan oo la isku halleyn karo. Dadaalladaas waxa ay qayb weyn ka yihiin xaqiijinta yoolalka horumarineed ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Guulahaas waxay muujinayaan go'aan-qaadashadayada ku aaddan xoojinta maamul-wanaagga, isla xisaabtanka, iyo horumarinta wadajirka ah ee Somaliland. WQHQ waxay sii wadi doontaa dhisida guulahaas, iyadoo xaqiijinaysa in siyaasadaha, qorshayaasha, iyo xeerarka aan soo saarnay ay noqdaan kuwo u horseedi kara horumarin muuqata nolosha shacabka Somaliland.

Marwo Kaltuun Sh. Xasan Cabdi

Wasiirka,

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka,

Mahadnaq



Aniga oo ku hadlaya magaca Wasaaradda Qorsheynta iyo Horumarinta Qaranka, waxaan u mahadcelinayaa dhammaan dadkii ka qayb qaatay guulaha la taaban karo ee laga gaadhay waxqabadka Wasaaradda intii u dhaxaysay January ilaa July 2025. Waxqabadkan oo ujeedadiisu ahayd in la xoojiyo aasaaska qorshaynta horumarineed iyo isku-duwidda dadaallada horumarineed ee dalka, ma noqon lahayn mid suurtagal ah haddii aanay jirin dadaalka, hawl-karnimada, iyo go'aan-qaadashada madaxda, shaqaalaha Wasaaradda, iyo dhammaan daneeyayaasha horumarineed. Dadaalka joogtada ah ee hoggaanka Wasaaradda oo ay ku jiraan Agaasimayaasha waaxyaha ayaa ahaa kuwo muhiim u ahaa dhammeystirka siyaasadaha iyo xeerarka istiraatiijiga ah, sameynta qiimeynno muhiim ah, iyo fududeynta habraacyada hagaya jihada horumarineed ee Somaliland sannadaha soo socda.

Sidoo kale, waxaan u mahadcelinayaa daneeyayaasha iyo saaxiibada horumarineed ee Somaliland oo ay ka mid yihiin hay'adaha aan dawliga ahayn ee maxalliga ah, kuwa caalamiga ah, kuwa Qaramada Midoobay, hay'adaha dowladda, iyo la-hawlgalayaasha farsamo kuwaas oo si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay dhammaan howlaha Wasaaradda. Taageeradooda, aqoontooda, iyo ka qaybgalka ay ku lahaayeen mashaariicda iyo siyaasadaha qaranka waxay ahayd tiir-dhexaadka xaqiijinta in qorshayaashu noqdaan kuwo waxtar leh oo la jaanqaadaya himilooyinka qaranka.

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku waxa ay mar kale ballanqaadaysaa in ay sii wadi doonto wada-shaqeyntaasi si loo xaqiijiyo horumar waara, loo dhan yahay, oo nolosha shacabka Somaliland si toos ah u taabanaya.

Mud. Maxamed Siciid Maxamuud

Agaasimaha Guud,

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka,

GUNAANADKA MAWAADIICDA

Warbixintani waxay si faahfaahsan u sharraxaysaa hawlaha muhiimka ah ee ay Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku (WQHQ) qabatay muddada January ilaa July 2025, iyadoo ay ka jawaabaysay amarrada kasoo baxay Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. Waxa cad in Wasaaraddu si firfircoon uga shaqeysay hirgelinta siyaasado iyo qorshayaal horumarineed oo waxtar u leh qaranka, iyadoo mudnaan siisay wax ka qabashada baahiyaha bulshada, kor u qaadista maamul-wanaagga, iyo kobcinta dhaqaale.

Warbixintu waxa ay muujinaysaa in Wasaaraddu ay si dhab ah u gaadhay guulo la taaban karo, kuwaas oo isugu jira kormeerka mashaariicda, diyaarinta shuruuc iyo siyaasad cad oo hagta qorsheynta qaranka, iyo in la hubiyo in dhammaan hawlahaasi ay yihiin kuwo ku salaysan xog sugan, isla xisaabtan, iyo wada-tashi. Guulahan waxay dhidibada u aasayaan qorshayn waarta, taasoo horseed u noqonaysa horumar loo dhan yahay oo Somaliland ku gaadho himilooyinkeeda qaranka.

WAXQABADKA WASAARADDA QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA QARANKA (JAN – JULY)

1. Tayaynta iyo Kor-u-qaadista Xog-koobidda Qaranka (National Statistics) B. Xoojinta Awoodda Istaatistikada Wasaaradda Qorshaynta

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku waxay gaadhay guul weyn oo ah in ay Heshiis is-Afgarad (HiA) ay kala saxeexdeen Xafiiska istaatikada qaranka ee Boqortooyada Ingiriiska (BI), taasoo ay leedahay fulintiisu Waaxda Istaatistikada, iyo Xafiiska Istaatistikada Qaranka ee BI. Heshiiskan waxa uu aasaas adag u dhigayaa horumarinta istaatikada iyada oo loo marayo dhisidda awoodaha, taageerada farsamo, iyo is-weydaarsiga aqoonta. Somaliland waxay ka faa'iidayaan doontaa khibrad ku saabsan istaatikada dhaqaalaha, cilmiga xogta (CX), iyo falanqaynta cilmiga bulshada. Sidoo kale, heshiisku wuxuu fududeynayaa taageerada farsamo ee mashaariicda qaran ee muhiimka ah, sida Sahanka qiyaasta dadweynaha iyo Tirakoobka dadka iyo guryaha, kuwaas oo muhiim u ah dejinta siyaasado sugan iyo qorsheynta qaranka.

Iskaashigan wuxuu sidoo kale xoojinayaa qaab-dhismeedka hay'adeed ee nidaamka istaatikada Somaliland iyada oo la horumarinayo maamulka, hoggaaminta, iyo siyaasadaha la xidhiidha Heshiiskani waxa uu dhigaya hab-maamuus sugan oo lagu wadaagayo xogta, si loo hubiyo qarsoodiga iyo amniga xogta, si waafaqsan heerarka caalamiga ah.

Intaa waxaa dheer, HiA-kani wuxuu qeexayaa shirar la qabanayo sannadkii ba laba jeer, si dib loogu eego horumarka la gaadhay iyo caqabadaha jira, taas oo sii xoojinaysa xidhiidhka joogtada ah ee u dhexeeya Waaxda Istaatistikada iyo Xafiiska Istaatistikada Qaranka ee BI. Tallaabadani waa horumar weyn oo lagu hagaajinayo go'aan-qaadashada ku saleysan xog sugan, taageeridda yoolalka horumarineed ee muddada-dheer, isla markaana xoojinaysa doorka WQHQ ee horumarinta awoodda istaatistikada qaranka.



T. Daabacaadaha Tirakoobka iyo Warbixinaha

Waaxda Dhexe ee Istaatistikada (CSD) waxay si weyn uga midho-dhalisay waajibaadkeedii asaasiga ahaa ee soo saarista warbixinno istaatistika ah, iyadoo dhamaystirtay daabacaado tiro badan oo muhiim ah:

Buuga Xogsidaha sanadlaha ah ee Somaliland 2025ka (Somaliland Infugares): Buug-sannadeedka tirakoobka qaran oo daboolaya waaxyaha caafimaadka, waxbarashada, dhaqaalaha, iyo shaqo-abuurka, ayaa maraya heerkaa ugu dambeeyay ee dib-u-eegis iyo ansixin, kadib markii la dhammeeyay xog-ururintii, falanqayntii, iyo qoraalkii warbixinta.

Halbeega Cabirka Ascaarta (CPI): Warbixinaha bille ah ee CPI-da ayaa si joogto ah loo daabacay bilihii January ilaa July 2025, iyadoo la adeegsanayo habraacyo caalami ah sida COICOP, Jevons, iyo Laspeyres. Nidaam cusub oo GPS-ku ku xidhan yahay ayaa la hirgeliyey si loo hubiyo tayada xogta iyo saxnaanta goobaha qiimaha laga soo ururiyo.

Warbixinta Cabirka Dhaqaalaha Wadanka ee 2025-ka: Xog ururintii iyo qoristii warbixinta ayaa la dhammeeyay, waxaana hadda socda dib-u-eegis farsamo oo uu wado khabiir sare.

Buugyaraha Xogta Ragga iyo Dumarka ee 2025: Xogta kala-soocan ee jinsiga ku saleysan ayaa la dhammeeyay waxaana warbixintu ku jirtaa marxaladda ansixinta gudaha.


Xogta Taxanaha ah ee Sanadada 2011-2024: Waxaa la diyaariyey xog ururin ballaadhan oo ka kooban in ka badan 60 tilmaamood oo ka socda 20 qeybood oo tirakoob ah, si loo taageero falanqeyn muddo-dheer ah.

Sahanka Dabagalka Mashaariicda Sanduuqa Horumarinta Somaliland: Waxaa lagu qaaday sahankan 2,125 qoys afar gobol oo Somaliland ah, isagoo qiimeeyay adeegyada la bixiyo iyo xaaladaha nololeed ee bulshada.

Sahanka Tusayaasha Isku-dhafan ee Qoyska Heerka 7aad (MICS7): Shaqooyin muhiim ah oo diyaar-garow ah ayaa la dhammeeyay, oo ay ka mid yihiin diyaarin su'aalaha sahanka, turjumiddooda, iyo tababarro la xidhiidha xog-ururinta iyo farsamaynta.

Dhamaystirka Sahanka Xogta Dhaqaalaha ee Qoyska ee 2022: Waxaa la dhammeeyay dib-u-eegistii farsamo ee warbixinta, waxaana lagu diyaariyay daabacaad.

Sahanka Heerka Dhimashada Barakacayaasha Somaliland ee 2023: Warbixintii ugu dambeysay ee dhimashada hooyada iyo ilmaha ee xeryaha barakacayaasha ayaa la dhammeeyay, waxaana lagu diyaarinayaa in si rasmi ah loo faafiyo.



J. Tayeynta Xogta iyo Casriyeynta Hababka Istaatistikada

Waaxda Dhexe ee Istaatistikada (CSD) waxay qaaday tallaabooyin muhiim ah si ay u mideyso una tayeeyso tayada Istaatistikada:

Hagayaal iyo Buugaag Tilmaameed: Waxaa la cusboonaysiiyay ama si cusub loo sameeyay hagayaal iyo tilmaamo la xidhiidha GDP, tilmaamayaasha dhaqaalaha guud, istaatistikada ee jinsiga, beeraha, dalxiiska, tamarta, maamul wanaagga, iyo buugga sannadlaha ah ee istaatistikada qaranka.

Kooxo Dib-u-Eegis iyo Ansixin: Waxaa la dejiyay waajibaadka shaqo (ToR) iyo magacaabista kooxo si loo xaqiijiyo saxsanaanta iyo kalsoonida warbixinaha la soo saaro.

Horumarinta Dijitaalka ah: Waxaa la hirgeliyay nidaam cusub oo lagu ururiyo xogta Halbeega Cabirka Ascaarta (CPI) oo isku xiran GPS bishii Luulyo 2025, si loo hagaajiyo raad-raaca xogta iyo kormeerka goobaha xogta laga qaado.

X. Maareynta, Habeynta, iyo Isku-duwidda Istaatistikada

Si loo xoojiyo maamul wanaagga iyo isu-duwidda nidaamka qaran ee istaatistikada, Waaxda Dhexe ee Istaatistikada (CSD) waxay qaaday tallaabooyin muhiim ah:

Wax-ka-beddelka Xeerka Istaatistikada Lr. 60/2013: Dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel lagu sameeyay xeerka istaatistikada ayaa la dhammeeyay waxaana loo gudbin doonaa Golaha Wasiirrada si ay u nasixiyaan casriyaynta saldhigga sharci ee istaatistikada.

Istaraatiijiyadda Horumarinta Istaatistikada Qaranka (NSDS III): Qoraal fikradeed (concept note) ayaa la dhammeeyay si uu u hago dib-u-eegista iyo dhamaystirka Istaraatiijiyadda Saddexaad, iyadoo UK ONS ay ballanqaadday taageero farsamo.

Buugyaraha Habraaca Macnayaasha iyo Fikradaha Xogta: Dukumenti dhameystiran ayaa la diyaariyay si loo mideeyo qeexitaannada iyo fikradaha istaatistikada ee dhammaan warbixinaha iyo xogaha la soo saaro.

Isku-duwidda Hay'adaha: Qoraallo is-afgarad (MoUs) rasmi ah ayaa la diyaariyay si loogu xoojiyo iskaashiga u dhexeeya CSD iyo wasaaradaha xoguhu khuseeyso.

Kooxda Farsamo ee Shaqada Istaatistikada: Waajibaad shaqo (ToR) ayaa loo diyaariyay si loo aasaaso madal rasmi ah oo isu timaadda saddexdii biloodba mar, taasoo hagi doonta Nidaamka Istaatistikada Qaranka (NSS).

KH. Kaydinta iyo Faafinta Xogta

Waaxda Dhexe ee Istaatistikada (CSD) waxay horumar ka samaysay kaydinta iyo faafinta xogta si dadweynuhu si fudud u helo:

Kaydinta Xogta: Dhamaan warbixinaha istaatistikada iyo xogaha aan wali lasoo saarin ayaa lagu kaydiyay goob dhexe oo isku-duwan. Kaydinta agabka tababarada ayaa wali socotaa.

Faafinta xaga Baraha Bulshada: Facebook ayaa loo adeegsaday faafinta xogaha muhiimka ah ee Halbeega Cabirka Ascaarta (CPI), taasoo kor u qaaday gaadhsiinta bulshada xogta.

- Muuqaal Wacyigelin ah oo ku Saabsan Halbeega Cabirka Ascaarta (CPI): Waxaa la sameeyay muuqaal sharaxaya ujeeddada iyo habka loo diyaariyo Xogsidaha Sanadlaha ah ee Somaliland, kaasoo la filayo in la sii daayo bisha August 2025.

2. Tayeynta Kobcinta Hannaanka Diiwaangelinta Hay'adaha aan Dawliga Ahayn (NGOs)

B. Fududeynta Diiwaangelinta Hay'adaha aan Dawliga Ahayn (NGOs)



Kahor inta aan la bilaabin habraaca diiwaangelinta ururada aan dowliga ahayn (NGOs), WQHQ waxay diiradda saartay fududeynta iyo habeynta dukumentiyada loo baahan yahay si ururadu ay si sahlan u dhammaystiraan shuruudaha diiwaangelinta. Laga bilaabo xilliga diiwaangelinta ee 2025, wadarta guud ee iska diiwaangeliyay WQHQ waa 261 ururo maxalli ah iyo 63 hay'ado caalami ah.

Habka diiwaangelintu wuxuu keenay dakhli la taaban karo, iyadoo laga ururiyay Hay'adaha caalamiga ah iyo ururada maxaliga ah **762,860,000** Shilin Somaliland ah. WQHQ waxay ansixisay 121 canshuur dhaaf oo la siiyay ururada buuxiyay shuruudaha u-qalmitaanka, taasoo fududeysay hawlhooda iyada oo la hubinayo u-hoggaansanaanta xeerarka dalka. Dadaalladan ayaa muujinaya sida wasaaraddu uga go'an tahay fududeynta hawlaha ururada aan dawliga ahayn, iyada oo la ilaalinayo hufnaanta iyo isla xisaabtanka habraaca diiwaangelinta.

T. Daraasad ku Saabsan Derejooyinka Ururada Maxalliga ah (LNGOs)

Waaxda Diiwaangelinta Hay'adaha iyo Mashaariicda ayaa dhawaan soo gabagabaysay daraasad ku saabsan Ururada Maxalliga ah ee aan Dawliga ahayn (LNGOs) si loo dejiyo qaab-dhismeedka lagu kala saari karo laguna darajeen karo. Daraasaddan oo ahayd mid dhammaystiran ayaa baadhay hababka ugu wanaagsan ee lagu fulin karo kala-saarista iyo darajaynta LNGOs, iyadoo la adeegsanayo cabbirro loo bixiyay A, B, C, iyo D si loo qiimeeyo awoodda hay'adeed ee ururada.

Ka dib markii si guul ah loo soo gabagabeeyay daraasaddan, waaxda ayaa hadda sugaysa ansixinta Sharciga NGO-yada, ka dibna waxaa la bilaabi doonaa qiimayn ballaadhan oo lagu samayn doono LNGOs. Qiimayntan ayaa ujeeddadeedu tahay in hawlaha LNGOs lagu waafajiyo heerarka la dejiyay iyo in la horumariyo daah-furnaanta Hay'adaha Maxalliga ah ee aan Dawliga ahayn.

J. Kaydinta iyo Diiwaangelinta Xogta Hay'adaha aan Dawliga Ahayn

Diiwaangelinta NGO-yada waa hawl socota sanadka oo dhan, waana mid ka mid ah waajibaadka ugu muhiimsan ee waaxda. Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa tirada NGO-yada diiwaangashan iyo dhaqaalaha ay usoo xareeyeen miisaaniyadda qaranka iyada oo loo marayo xafiiska cashuuraha bariga (Inland Revenue).

Nooca Hay'adda / Ururka	Lambarka	Dakhliga ay soo Xareeyaan
Ururada Maxaliga ah (Dib-u-cusboonaysiin)	159	115,821,000 SLSH
Ururada Maxaliga ah (Cusayb)	102	22,048,775 SLSH
Hay'adaha Caalamiga ah (Dib-u-cusboonaysiin)	59	46,500 USD
Hay'adaha Caalamiga ah (Cusayb)	4	6,000 USD
Total		SLSH 762,860,000 \$ 76,386



3. Dhammaystirka Habraacyada, Siyaasadaha iyo Xeerarka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka

B. Dhamaystirka Dib-u-egista Xeerka Istaatikada



Mudnaanaha WQHQ waxa ka mid ah dhammaytirka dib-u-eegista xeerka istaatikada qaranka, oo hore loo ansixiyay lambarkiisuna yahay 60/2013. Maadaama wakhtigii xeerkan la sameeyay hadda laga joogo muddo 12 sanno ah, ayna is beddeleen nidaamyo badan oo waagaas xeerka lagu jideeyay, iyo in sida waaqica ah ay tahay in dib-u-eegis lagu sameeyo shuruucda marka ay muddo jiraan. Sidaa darteed, waxa ay WQHQ ku go'aamisay in xeerkan dib-u-eegis lagu sameeyo.

Haddaba, maaddaama oo ay qodobka 49^{aad} Ee Xeerka Kala-xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan Ee Xeer.Lr.71/2015 iyo qodobka 28^{aad} Ee Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Ee Xeer.Lr.01/2018 ay WQHQ ku waajibiyeen sugidda, ururrinta iyo kaydinta xogaha sidoo kalena ay gacanta ku hayso qorshayaasha qaranka ee kala duwan ama ay ku lug leedahay barnaamijyada kala duwan ee ka socda guud ahaan Dalka Jamhuuriyadda Somaliland (***Barnaamijyada Dibu-habaynta Adeegyada Dawladda***) iyo qorshayaasha kale ee xukuumadda, waxaa wakhti xaadirkan muuqata in xeerkani aanu hadda aas-aas u ahayn hababka ugu habboon ee loo ururinayo, sugayo ama loo kaydino xogaha kala duwan ee ku duugan. Sidaa darteed, waxa ay WQHQ ku samaysay dibu-habayn, waxka-beddel iyo kaabis nuxurka xeerka statistics-ka Xeer.Lr.60/2013 sababaha aan soo xusnay darteed.

Haddaba, si loo gaadho hadafka iyo xaqiijinta arrintaas, waxa ay WQHQ shaqaalaysiisay khabiir ku xeel-dheer arrimaha shuruucda si uu u hoggaamiyo dib-u-eegista xeerkan, isla markaana loo qabto shirar dhammaan Hay'adaha Dawladda si ay u bixiyaan faallooyin, talooyin, iyo aragtiyo qiimo leh.

Ugu dambayntii, nuqulka cusub ee xeerkan WQHQ waa ay dhammaystirtay, oo waxa uu usoo gudbi doonaa golaha Wasiirada si ay uga doodaan, isla markaana loo ansixiyo ka dibna loo gudbiyo Golaha Wakiilada.

T. Dhamaystirka Xeerka Qorshaynta Qaranka



Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku markii ay aragtay baahida weyn ee loo qabo in la helo xeer qaran oo qorshayneed, maadaama la diyaariyey Siyaasadda Qorshaynta Qaranka (SQQ), waxa ay WQHQ bilowday in la sameeyo Xeerka Qorshaynta Qaranka (XQQ), muddo ka dib waxa lagu guulaystay in 2021 la keeno qabyo-qoraalka XQQ. Nasiib darro se lama dhammaystirin oo illaa muddo ku siman 4 sanno ayey ahayd qabyo-qoraal aan meelna u gudbin.

Waxa ay hadda WQHQ ku guulaystay in ay dib u bilowdo dhammaystirka hawshan, iyada oo khabiir ku xeel-dheer arrimaha sharciga heshiis kula gashay in uu dhammaystiro hawshaas. Waxa iyana muhiim ahayd in shirar wadatashi lala yeesho HD si ay talo iyo tusaale ba uga dhiibtaan mashruuc sharcigan.

Ujeedooyinka mashruuc sharcigan ay WQHQ curisay waxa uu xambaarsan yahay waxaa ka mid ah: -

1. In la helo xeer gaar ah oo lagu nidaamiyo qorshaynta qaranka
2. In lagu faahfaahiyo geeddi-socodka iyo hannaanka loo qaabaynayo qorshaha heer qaran, heer gobol iyo heer degmo, waajibaadka guud ee dawladda iyo laamaheeda kala duwan.
3. In lagu qeexo qorshayaasha dawladda ee la xidhiidha maamulka maaliyadda qaranka
4. In lagu jaangooyo siyaasadaha muhiimka ah ee ay dawladdu u adeegsanayso qorshayaasha qaranka.
5. In lagu tilmaamo hababka qiimaynta, warbixinaha qorshayaasha qaranka, kor-joogtayntooda iyo qiimayntooda.
6. In lagu qaabeeyo qorshayaasha mudada dhexe ee dawladda iyo hannaanka loo fulinayo.

Xeerkan waxa looga gol leeyahay inuu abuurdo hannaan maamul oo habaysan taas oo iswaafajinaysa siyaasadda qorshayaasha heer qaran, gobol iyo degmoba isla markaana loo jideeyo xeer lagu maamulo oo cad iyada oo la raacayo istiraatiijiyad midaysan.

Ugu dambayntii, nuqulka cusub ee mashruuc sharcigan waa ay dhammaystirtay WQHQ, oo waxa uu hadda usoo gudbi doonaa Golaha Wasiirada.

J. Dhamaystirka Siyaasadda Qorshaynta Qaranka



Maqnaanshaha Siyaasadda Qorshaynta Qaranka iyo Xeerka Qorshaynta Qaranka waxa ay sababtay isticmaalida nidaam qorshayneed qaran oo aan lahayn siyaasad cad oo la yaqaano, hirgelin aan ku xidhnayn aragtida qaranka, iyo istiraatiijiyadaha hay'adaha Dawladda midna. Sidoo kale, waxa ay keentay in qorshayaasha horumarinta degmooyinku aanay si habsami leh ugu xidhmin nidaamka qorshaynta qaranka. Kadib, markii ay WQHQ aragtay baahida weyn ee loo qabo in la helo siyaasad qaran oo qorshayneed, waxa ay bilowday in siyaasaddaas la diyaariyo, muddo ka dib waxa lagu guulaystay in 2021 la keeno qabyo-qoraalka SQQ. Nasiib darro se lama dhammaystirin oo illaa muddo ku siman 4 sanno ayey ahayd qabyo qoraalkaas oo aan meelna u gudbin.

Waxa ay hadda WQHQ ku guulaystay in ay dib u bilowdo dhammaystirka mudnaantan, iyada oo khabiir ku xeel-dheer arrimaha siyaasadaha heshiis kula gashay in uu dhammaystiro siyaasaddan. Waxa iyana muhiim ahayd in shirar wadatashi lala yeesho HD si ay talo iyo tusaale ba uga dhiibtaan siyaasaddan.

Siyaasadda Qorshaynta Qaranku waxa ay ku dhisan tahay hab qorshayneed is-daba-joog ah, ka-qaybgal ballaadhan leh, iyo hannaan wada-jir ah, iyada oo hubinaysa isku xidhnaanta u dhaxaysa qorshaynta iyo miisaaniyadda. Siyaasaddan waxa loo dejiyay in ay hagto hannaanka loo qorsheeyo, loo hirgeliyo, loogu dabagalayo, looguna qiimaynayo Qorshayaasha Horumarinta Qaranka.

Siyaasaddan waxa ay dejinaysaa qaab cad oo nidaamsan oo lagu hago qorshaynta horumarineed ee heer qaran, heer gobol, iyo heer degmo. Waxa ay hubinaysaa isku xidhnaanta u dhaxaysa aragtida qaranka, qorshayaasha horumarineed, iyo habraacyada miisaaniyadda, iyada oo dhiirrigelinaysa ka-qaybgalka dhammaan daneeyayaasha.

Siyaasadani waxa ay doonaysaa in ay abuurto hannaan maamul oo habaysan taas oo iswaafajinaysa qorshayaasha heer qaran, gobol iyo degmoba iyada oo la raacayo istaraatiijiyad midaysan.

Ugu dambayntii, nuqulka cusub ee siyaasadan WQHQ waa ay dhammaystirtay, waxa uu usoo gudbi doonaa Golaha Wasiirada si ay uga doodaan, isla markaana loo ansixiyo.

X. Dejinta Habraaca Siyaasadaha Qaranka

Qabyo-qoraalkii hanaanka Horumarinta Siyaasadaha Qaranka (National Policy Development Guideline) ayaa hadda si buuxda loo dhammaystiray. Habraacan waxaa loo sameeyay si loo mideeyo siyaasad-dejinta dhammaan hay'adaha Dawladda, loona hubiyo in siyaasad kasta oo la sameeyo ay ku salaysnaato xog rasmi ah, isla markaana ay waafaqsanaato qorshaha Horumarinta Qaranka (QHQ). Sidaa darteed, si loo dhaqan-geliyo hanaankan cusub, waxaa la qaban doonaa aqoon-is-weydaarsi farsamo oo lagu tababari doono dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawliga ah ee kala duwan, si ay u bilaabaan isticmaalka habraacan mideysan.



KH. Ururinta iyo Kaydinta Siyaasadaha Qaranka

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku waxa ay qabatay qiimeyn dhamaystiran oo ku saabsan dhammaan siyaasadaha iyo xeerarka ay isticmaalaan Hay'adaha Dawladdu. Arrintani waxay muhiim u ahayd in la ogaado siyaasadaha iyo xeerarka ay hay'ad kasta oo dawli ahi ku shaqayso, iyo in hal goob la isugu geeyo si ay u sahlanaato in xogtaas goob kaliya laga wada heli karo.

Arrinta kale ee aad ka u muhiimka ah ayaa ahayd, in la ogaado hay'adaha dawladeed ee aan lahayn wax siyaasad iyo xeer ah, iyo sida oo kale in la sugo isla markaana lasoo bandhigo meelaha u baahan in laga sameeyo siyaasad cad oo fududayn karta hawlaha shaqo ee ay u xilsaaran yihiin Hay'adaha Dawladeed ee Dalka JSL ka jira.

Wasaaraddu waxay diyaarisay xog ururin dhamaystiran oo ku saabsan xeerarka iyo siyaasadaha ka jira hay'ada dawladda, kuwaas oo ay xogta kasoo qaaday 25 Wasaaradood iyo 12 Hay'ad dawladeed taas oo noqon doonta macluumaad muhiim ah oo loo isticmaali doono in lagu go'aan qaato mustaqbalka.

Ugu dambayntii, waxa xusid mudan in badi siyaasadahaas iyo xeerarkaasi ay qabyo qoraal yihiin, kuwaas oo u baahan in la geeyo golayaasha ay khuseeyaan si loo dhammaystiro oo ay u noqdaan dikumantiyo rasmi ah.

D. Dhamaystirka Habraacyada Sanduuqa Horumarinta Qaranka

Yagleelidda Sanduuqa Horumarinta Qaranku (SHQ) waa arrin aad u muhiim ah oo loogu talagalay in la isugu keeno miisaaniyadaha horumarinta ee hay'adaha dawladda. Hore, mashaariicda horumarineed ee hay'adaha dawladdu waxa ay si toos ah ugu jirtay miisaaniyadaha kala duwan ee hay'adaha dawladda, taas oo keentay in Hay'ad kasta ay si gaar ah u maamulato miisaaniyaddaas loo qoondeeyay horumarinta. WQHQ iyada oo hogaamisa Guddiga Qorshaynta Qaranka (GQQ), waxay diyaarisay habraac cad oo ku saabsan sidii loo maamuli lahaa SHQ, iyadoo sharraxaysa howlaha, mas'uuliyadaha, iyo meelaha muhiimka ah.

Sanduuqan oo la aasaasay bishii 4aad ee sannadkii hore kaas oo noqon doona sanduuq dhaqaale oo ka shaqayn doona horumarinta iyo maal galinta mashaariicda horumarineed ee ay Somaliland hal-abuurto. Sanduuqan ayaa yeelan doona miisaaniyad u gaar ah oo lagu maalgeliyo mashaariicda horumarineed ee Dalka, isla markaana lagu maal galin doono mashariicda isku dhafka ah (flagship Projects). Sida oo kale sanduuqu waxa gundhig u ah dhiirrigalinta hal-abuurka mashaariic horumarineed, si loo horumariyo dalka dhaqaale ahaan, isla markaana qayb weyna ka qaadata horumarka dhaqan-dhaqaale ee bulshada Somaliland.

Ujeedooyinka guud ee Sanduuqa Hormarinta Qaranku waxa ay noqon doonaan:

1. Dhiirigalinta mashaariicda horumarineed kuwaas oo laga hirgalinayo miisaaniyada qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Maalgalinta ilo-dhaqaale si kor loogu qaado dhaqaalaha wadanka.
3. Abuuridda fursado shaqo oo hor leh si loo gaadho horumar waara.
4. Dhiirigelinta ka qayb-qaadashada bulshada ee dhinaca horumarka dhaqan-dhaqaale ee dalka
5. Gacan ka gaysashada hal abuur ka fursado shaqo oo ay bulshadu ka hesho maal malinta mashaariicda horumarinta qaranka.

Sidaa darted, si loo helo habraac lagu maamulo sanduuqaas muhiimka u ah qaranka JSL, waxa ay WQHQ iyo WMHDH diyaarisay habraac tilmaamaya sida loo maamulayo, cidda maamulaysa iyo habka ugu wanaagsan ee SHQ u hirgeli doono.





R. Xeer-Hoosaadka Xil-Wareejinta Xafiisyada

Waxaa la dhammeeyay xeer-hoosaad nidaaminaya habka wareejinta xilalka marka ay dhacaan isbeddello hoggaamineed ama beddelaad shaqaale. Habraacan cusub waxay ujeedadiisu tahay in la hubiyo joogtaynta shaqada, kaydinta xogta, in laga hortago lumista macluumaadka shaqo, iyo in la dhiirrigeliyo daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.



1. Qiimeynta iyo Dabagalka Mashaariicda Horumarineed ee ka socda Somaliland

B. Soo-saarka Wareegtada Heer Wasiir ee Dabagalka iyo Qiimaynta

<p>JAMHUURIYADDA SOMALILAND WASAARADDA QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA QARANKA Republic of Somaliland Ministry of Planning and National Development Minister</p>  <p>Wasiirka</p>	<p>JAMHUURIYADDA SOMALILAND WASAARADDA QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA QARANKA Republic of Somaliland Ministry of Planning and National Development Minister</p>  <p>Wasiirka</p>	
<p>١٧/١١/٢٠٢٠</p>	<p>Date: 24/11</p>	<p>Date: _____</p>
<p>To: All Ministries, Departments, and Agencies UN INGOs LNGOs</p>		
<p>Subject: Ministerial Decree on Monitoring and Evaluation</p>		
<p>In accordance with the national mandate, this decree outlines the role of the Ministry of Planning and National Development, henceforth MoPND, in monitoring and evaluation and the responsibilities of implementing agencies.</p>		
<p>1. Objective To establish a comprehensive framework for the monitoring and evaluation processes to ensure that decisions are based on accurate findings and recommendations, and to regulate actions such as corrections, avoidance of duplication, and project suspension.</p>		
<p>2. Scope This decree applies to all projects registered by the MoPND (All projects and programs implemented in Somaliland must be registered by the MoPND). MoPND has the exclusive authority at the national level to conduct M&E activities. No other ministry or institution shares this mandate.</p>		
<p>3. Roles and Responsibilities</p>		
<p>a. Implementing Agencies Responsibilities:</p> <ul style="list-style-type: none">• Implementers are required to follow the procedures and tools set by the MoPND for conducting monitoring operations.• Implementers must ensure that all monitoring activities are in line with the MoPND's guidelines and standards.• Any findings from monitoring and evaluation activities must be reported to the MoPND promptly and accurately.• Implementers must submit any project documents needed to the M&E Department when requested.• Implementing agencies must strengthen collaboration and cooperation with MoPND, particularly its Monitoring and Evaluation Department, to enhance coordination, accountability, and data-driven decision-making, ensuring development initiatives effectively improve the lives of the Somaliland people.		
<p>b. MoPND's Responsibilities:</p> <ul style="list-style-type: none">• The MoPND will make decisions based on the outcomes in the monitoring and evaluation reports.		
<p>4. Decision-Making Authority The Minister of MoPND holds the ultimate decision-making power regarding the monitoring reports and recommendations. Based on the findings, the Minister will:</p> <ul style="list-style-type: none">• Approve corrective actions.• Implement measures to avoid duplication.• Suspend projects if necessary.		
<p>5. Conclusion This decree reaffirms the Ministry of Planning and National Development's commitment to effective monitoring and evaluation at the national level. Implementers must strictly adhere to the guidelines and procedures outlined herein to ensure the success and integrity of projects and programs implemented in Somaliland.</p>		
<p>Hon. Kaltun Sh Hassan Abdi Minister Ministry of Planning and National Development</p>  		
<p>CC: President of the Republic of Somaliland</p>		
<p>mopnd.govsomaliland.org Email: minister.mopnd@slmopnd.govsomaliland.org Email: minister.mopnd@slmopnd.govsomaliland.org</p>		

Wareegtada Wasiirka ee Kormeerka iyo Qiimeynta wuxuu ka mid yahay guulaha dheeraadka ah ee WQHQ. Wareegtadani waxa ay dejinaysaa qaab-dhismeed dhammeystiran oo lagu hagayo howlaha Kormeerka iyo Qiimeynta (M&E), si loo hubiyo in dhammaan mashaariicda iyo barnaamijyada laga hirgelinayo Somaliland ay la jaanqaadaan yoolalka horumarineed ee qaranka. Iyadoo WQHQ loo siiyay awood gaar ah oo ay si rasmi ah ugu maamusho hawlaha qiimaynta iyo dabagalka heer qaran, wareegtadu waxa ay xoojinaysaa awoodda wasaaradda ee korjoogtaynta mashaariicda horumarineed, ka hortagga is-dulsaarka (duplication), iyo xaqiijinta isla xisaabtanka. Wareegtadu waxa ay sidoo kale waajibinaysaa in hay'adaha fulinta, oo ay ku jiraan hay'adaha Qaramada Midoobay (QM), hay'adaha aan dawliga ahayn ee caalamiga ah (INGOs), iyo kuwa maxalliga ah (LNGOs), ay u hoggaansamaan hagaha WQHQ ayna soo gudbiyaan warbixino sax ah oo wakhtigooda lagu soo gudbiyey. Tani waxay muujinaysaa sida wasaaraddu uga go'an tahay go'aan-qaadashada ku saleysan xog sugan iyo xoojinta waxtarka mashaariicda horumarineed ee Somaliland.

Muhiimadda wareegtadan ayaa ah in la fududeeyo habraacyada dabagalka iyo qiimaynta, si loo hubiyo in mashaariicda horumarineed ay noqdaan kuwo daahfuran, hufan, oo wax-ku-ool ah. Wareegtadu waxa ay dhammaan mashaariicda ku waajibinaysaa inay iska diiwaangeliyaan WQHQ, waxa ayna adkaynaysaa wada-shaqeynta u dhexeysa hay'adaha fulinta iyo wasaaradda, taasoo kor u qaadaysa isku-dubaridka iyo isla xisaabtanka. Wuxuu sidoo kale awood u siinayaa

Wasiirka WQ&HQ inuu go'aamo ka gaadho natiijooyinka kasoo baxa kormeerka iyo qiimeynta, oo ay ku jiraan ansixinta tallaabooyin sixitaan ah, ka hortagga is-dulsaarka, iyo hakinta mashaariicda aan waxtarka lahayn haddii loo baahdo. Qaab-dhismeedkan wuxuu sare u qaadaya hufnaanta barnaamijyada horumarineed, wuxuuna hubinayaa in kheyraadka si habboon loo isticmaalo si nolosha shacabka Somaliland loo horumariyo. Xeerkan wuxuu mar kale xoojinayaa hoggaanka WQ&HQ ee hagidda ajendaha horumarineed ee Somaliland, wuxuuna dhidibada u aasayaa aasaas adag oo lagu gaadhi karo koboc iyo horumar waara.

T. Xogta Qiimaynta iyo Dabagalka Mashaariicaha

Waxa la soo sameeyay qiimayn wadajir ah oo lagu soo kor-jooqteeyay kow iyo toban (11) mashruuc oo horumarin ah, iyada oo ay wasaaraddu kaashanayso hay'adaha mashariicdaas maamulaya oo ay ka mid yihiin Direct Aid, SOMREP Consortium, Save the Children, iyo kuwo kale.

Waxa dib u eegis lagu sameeyay xogta laba iyo soddon (32) mashruuc oo kow iyo labaatan (21) mashruuc oo ka mid ah ay wasaaraddu u diyaarisay in qiimayn lagu soo sameeyo.


Wasaaraddu iyada oo ka duulaysa in ay la jaan-qaaddo cabirrada caalamiga ee lagu dabagalo isla markaana lagu qiimeeyo mashaariicda horumarineed, waxa ay diyaarisay xog-jeedinno, iyo xog-qabadyo (reporting guidelines and templates) la jaanqaadaya in mashaariicda horumarineed loo maro qiimayntooda iyo go'aan qaadashadoodaba

Iyada oo laga duulayo kobcinta aqoonta iyo khibrada shaqaalaha, waxa tababarro saddex nooc ah la siiyay shaqaalaha ka shaqeeya qiimayn iyo dabagalka mashaariicaha horumarineed.

S/N	Implementing Partner	Projects Monitored
4.	Relieve Humanity International	1. Mobile Clinic Project
5.	SOMREP Consortium	2. EU BREACH, 3. SIDA III
1.	Direct Aid	4. Gebiley Social Welfare Programme, 5. ENT Surgery, 6. Eye Surgery, 7. Microfinance Grant, 8. Water Infrastructure
2.	Save the Children	9. Better Life Program Verification
3.	OWDA	10. Resilience and WASH Support in Maroodi Jeex
4.	SOS Medivac	11. Dental and Emergency Rural Services

6. Tayeynta Hannaanka Cudduda Shaqaalaha

B. Dib-u-eegista Waajibaadka iyo Qaab-dhismeedka Waaxaha Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka



Qaybtani waxay diiradda saartay dib-u-eegis dhameystiran oo lagu sameeyay waajibaadka iyo qaab-dhismeedka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka (WQHQ), si loo xoojiyo waxtarkeeda ku aaddan hagidda ajendaha horumarineed ee Somaliland. Dib-u-eegistan waxay ujeeddadeedu ahayd in hawlaha WQHQ ay la jaanqaadaan mudnaanaha horumarineed ee qaranka, si ay si wax ku ool ah u hogaamiso una fuliso siyaasadaha, qorshayaasha, iyo barnaamijyada horumarineed. Qodobada ugu muhiimsan ee dib-u-eegista waajibaadka wasaaradda waxaa ka mid ahaa caddeynta doorkeeda ku aaddan dejinta qorshayaasha horumarineed ee muddada gaaban, kuwa dhexe, iyo kuwa fog, iyo sidoo kale mas'uuliyadeeda la xidhiidha kormeerka iyo qiimeynta mashaariicda horumarineed. Dib-u-eegistu waxay sidoo kale adkaysay muhiimadda ay leedahay abaabulka kheyraadka, isku-dubaridka deeq-bixiyeyaasha, iyo soo saarista xog sugan oo lagu saleyn karo go'aan-qaadasho cilmi-ku-salaysan.

Qaab-dhismeedka WQHQ waxaa dib loogu habeeyay si kor loogu qaado waxtarka iyo in la baabi'yo is-dul-saarka iyo khilaafaadka shaqo. Qaab-dhismeedka cusub wuxuu dib u yagleelay waaxyo iyo unugyo khaas ah, sida Waaxda Tirakoobka Dhexe, oo diiradda saarta ururinta iyo falanqeynta xogta dhaqaale iyo bulsho, iyo Waaxda Qorshaynta iyo Isku-dubaridka, oo mas'uul ka ah dejinta siyaasadaha iyo abaabulka kheyraadka. Sidoo kale, Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta waxay xaqiijin doontaa waxtarka iyo joogtaynta mashaariicda horumarineed iyo kuwa gargaarka, halka Waaxda Diiwaangelinta ay sii wadi doonto xakamaynta iyo nidaaminta hay'adaha aan dowliga ahayn (NGOs) ee ka howlgala Somaliland. Dib-u-habayntani waxay ujeeddadeedu ahayd in la hagaajiyo howlaha wasaaradda, la xoojiyo wada-shaqeynta waaxyaha kala duwan, iyo in la

hubiyo in hawlaha wasaaraddu ay la jaan-qaadayaan waajibaadkeeda iyo himilooyinka horumarineed ee qaranka.

Sidoo kale, dib-u-habayntu waxay xoojisay muhiimadda waaxyaha taageerada, sida Maamulka iyo Maaliyadda iyo, Cududda Shaqaalaha, iyo Teknoolojiyadda Xogta iyo Isgaadhsiinta (ICT), si loo xoojiyo awoodda hawlgal ee WQHQ. Waxaa sidoo kale la sameeyay xafiiska Kormeerka Gudaha, xafiiska Xidhiidhka Dadweynaha iyo Isgaadhsiinta, xafiiska Xidhiidhka Gobolada, iyo xafiiska Arrimaha Sharciga, si loo xaqiijiyo u-hoggaansanaanta shuruucda, hufnaanta, iyo isgaadhsiinta wax-ku-ool ah oo lala yeesho daneeyayaasha kala duwan. Dib-u-qaabayntani waxay wasaaradda u suurto-gelinaysaa in la xoojiyo qaab-dhismeed adag oo wax ka qaban kara caqabadaha horumarineed ee Somaliland.

7. Isku-dubaridka Hawlaha Qorshaha Horumarinta Qaranka

B. Qabashada Shir Farsamo ee Dib-u-eegista Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Saddexaad



Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku waxa ay 8dii bisha koowaad 2025, qabatay shir farsamo si wax la isaga waydiiyo loogana tashado dib-u-eegista Qorshaha Horumarinta Qaranka

ee Saddexaad (QHQ 3). Shirka waxaa diiradda lagu saaray aad na loo naaqishay QHQ 3 iyada oo lasoo bandhigay tiirarka (pillars) iyo wadaagayaasha (sectors) uu ka kooban yahay QHQ 3.

Waxa iyadana qayb weyn qaatay in diiradda la saaro barnaamij siyaasadeed ka xisbiga Waddani oo madasha lagu soo bandhigay isla markaana loo baahiyey wadaagayaasha uu isna ka kooban yahay si la isula eego in la is waafajin karayo QHQ 3 iyo barnaamijka xisbiga.

Falanqayn dheer ka dib, waxa ay hawl-wadeenada WQHQ ay isla qaateen in ay si weyn isu waafaqayaan labadan dikumanti, isla markaana loo baahan yahay in dib-u-habayn yar sidii mudnaanaha ku jira QHQ 3 iyo barnaamijka xisbiga meel la isugu geyn lahaa oo looga samayn lahaa hal dikumanti, si ay hay'ad kasta oo dawladeed ugu fududaato hirgelinta iyo qabashada hawlaha ay masuulka ka tahay.

Ugu dambayntii, waxa shirkaas kasoo baxay in WQHQ ay si buuxda hawshaa u dhammaystirto iyada oo bilaha dhow aanu soo saari doonno dikumantigaa muhiimka u noqon doona HD ee JSL.

T. Diyaarinta Shirweynaha Heerka Sare ee Isku-dubbaridka Horumarka (High Level Development Coordination Forum)



25-kii bisha labaad 2025, waxaa magaalada Hargeysa, Somaliland lagu qabtay Shirweynaha Heerka Sare ee Isku-dubaridka Horumarka (SHSIH). Ujeeddada ugu weyn ee shirka ayaa ahayd in la fududeeyo wadahalallo istraatijiyadeed oo heer sare ah, si loo xoojiyo xidhiidhka shaqo ee u

dhexeeya Somaliland iyo bah-wadaagyadeeda caalamiga ah. Shirku wuxuu diiradda saaray dhiirrigelinta lahaanshaha (ownership), isla-xisaabtanka (mutual accountability), isku-dubaridka (harmonization), iyo la jaan-qaadka (alignment) arrimaha horumarineed ee muhiimka ah. SHSIH wuxuu siiyay madal wadahadal oo lagu hubinayo in dadaallada horumarineed ay waafaqsan yihiin Qorshayaasha Horumarinta Qaranka (QHQ) ee Somaliland. Intaa waxaa dheer, shirka ayaa noqday meel lagaga hadlo horumarka laga gaadhay yoolalka la dejiyay, la caddeeyo mas'uuliyadda fulinta ee bah-wadaagyada kala duwan, iyo in si wadajir ah xal loogu helo caqabadaha jira.

Shirka waxaa guddoomiyey Wasiirka Qorsheynta iyo Horumarinta Qaranka, iyadoo hadal soo dhaweyn ah uu ka jeediyay Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah. Wasiirka Madaxtooyada iyo Wasiirka Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa soo bandhigay dulmar guud oo ku saabsan xaaladda siyaasadeed iyo dhaqaale ee Somaliland. Wasiirka Qorsheynta iyo Horumarinta Qaranka ayaa kadib soo bandhigtay mudnaanaha horumarineed ee dawladda, oo ay ku jiraan ammaanka iyo isku-duubnida bulshada, maamul-wanaagga loo dhan yahay, iyo koboca dhaqaalaha, iyadoo ay weheliyaan mowduucyo sida sinnaanta jinsiga, horumarka loo dhan yahay, iyo isbeddelka cimilada. Bah-wadaagyada horumarineed ayaa sidoo kale soo bandhigay barnaamijyadooda iyo mashaariicda ay ka wadaan Somaliland, iyadoo iftiimiyay doorkooda ku aaddan ajendaha horumarineed ee dalka. Shirka ayaa lagu soo gabagabeeyay soo bandhigidda Hannaanka Iskaashiga Somaliland (HIS) iyo hagaha SHSIH (ToR), kuwaas oo loo ansixiyay inay noqdaan dukumintiyo hagaya hawlaha iskaashi ee la xidhiidha horumarka Somaliland.

Shirku wuxuu kusoo dhammaaday ballanqaad adag oo ay sameeyeen dhammaan dhinacyadii ka qeyb galay, kuwaas oo ku heshiiyay in la sii xoojiyo wada-shaqeynta, iyadoo shir kale la qorsheeyay lix bilood kadib. Xoghaynta shirka ayaa loo xilsaaray inay bilowdo diyaargarowga iyo wargelinta ka qaybgalayaasha kulanka xiga. Qodobada ugu muhiimsan ee shirka lagu go'aamiyay waxaa ka mid ahaa in dadaallada horumarineed lagu waafajiyo mudnaanta Somaliland iyo in la xaqiijiyo isla-xisaabtanka u dhaxeeya dowladda iyo bah-wadaagyada caalamiga ah. Ansixinta HIS iyo habraaca madasha ayaa calaamad u noqotay tallaabo weyn oo hore loogu qaaday xoojinta qaab dhismeed iskaashi oo nidaamsan si wax looga qabto caqabadaha horumarineed ee Somaliland. SHSIH wuxuu markale muujiyay muhiimadda ay leedahay wadahadalka joogtada ah iyo iskaashiga si loo gaadho yoolalka horumarineed ee wadajirka ah.

Kulamada Hayadaha iyo Safiiradda

Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku waxa ay kulamo kala duwan la yeelatay hay'adaha UN, EU, INGO, LNGO, ururrada Carabta, safiirro, iyo khubaro ka kala socday dalal badan. Inta lagu guda jiray kulamadan, Wasaaraddu waxay la wadaagtay macluumaad ku saabsan Qorshaha Horumarinta Qaranka ee saddexaad, mudnaanta horumarka ee Xukuumadda, isla markaana ku hagaysay dariiqa istaraatiijiyadda iyo aragtida ay Somaliland ka leedahay horumarka Qaranka, iyada oo ka duulaysa qorshayaasha qaranka iyo yoolalka horumarka waara ee caalamiga ah.



Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka oo la kulmay wefti ka socday safaaradda Switzerland ee Bariga Afrika.



Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta oo xafiiskeeda ku qaabishay Agaasimaha Xafiiska Horumarinta Dawladda Ingiriiska iyo wefti sare oo ka socday FCDO.





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka Marwo Kaltuun Sh. Xasan Cabdi ayaa xafiiskeeda ku qaabishay madax sare oo ka socota Xafiiska Horumarinta Caalamiga ah ee Dowladda Ingiriiska (FCDO).





Wasiirka Qorshaynta oo xafiiskeeda ku qaabishay wefti ka socday Hay'adda Cunnada iyo Beeraha Adduunka (FAO).





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta oo ay weheliyaan Agaasimaha Guud ayaa xafiiskeeda ku qaabishay wafdi sare oo ka socday hay'adda caalamiga ah ee MedAcros.





Wasiirka Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka oo xafiiskeeda ku qaabishay wakiilka cusub ee xafiiska Ingiriiska (FCDO) ee Somaliland.





Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta oo qaabilay wakiilka cusub ee hay'adda The Development Fund (Norway).





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Marwo Kaltuun oo guddomineysay kulanka Guddiga Hagidda ee Mashruuca Barwaaqo.





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka JSL oo xafiiskeeda ku qaabishay wafti sare oo uu hoggaaminayey Mr. Etienne Peterschmitt, Madaxa Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO).





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta ayaa Gudoominayey kulan wada-tashi oo ku saabsan Dib-eegista iyo Hormo gelinta Mudnaanaha Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 3aad.






Wasaaradda Qorshaynta Marwo Kaltuun ayaa guddoomisay kulan lagu dardargelinayo wejiga saddexaad ee mashaariicda SDF.





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka ayaa kulamo la yeelatay Wakiilka Qaramada Midoobay (UNSOM) iyo Madaxa Iskaashiga ee Safaaradda Jarmalka ee Nairobi





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka, oo ay weheliyo Agaasimaha Guud ee wasaaradda, oo kulan la qaatay Khalid Al-Qudsi, Madaxa Xafiiska Hay'adda Cunnada Adduunka (WFP) ee Hargeysa.





Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka, Md. Maxamed Siciid Maxamuud, ayaa guddoominayey kulanka hawl-wadeennada Mashruuca Barwaaqo iyo Hoggaamiyaha Mashruuca (TTL) ee Baanka Adduunka.





Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka Somaliland ayaa xafiiskeeda ku qaabishay wefti sare oo uu hoggaaminayo, Madaxa Iskaashiga ee Safaaradda Jarmalka ee Nairobi



